# HA DHAWICIN KALGACALKA



QISO JACEYL

EED MALAHA JACEEYLKA
WAXA I SOO ABAABULAY
A/B'HEENA AADAN MARKUU
BE;AY XAAWO INEY AAYO
W/CAN TAHAY.

W.Q.

C/LAAHI CABDI XUSEEN [illegible]

Waxaa sii liiďaysay Qoraxdii galbeed una carraa-
baysay godkeedii habeenimo.

Habeenku wuxuu ahaa mid ka macaan kana qa-
darin sareeya kana qurux badan habeenada kale.

Jawigu wuxuu ahaa mid degan; nasiibkuna wu-
xuu ahaa mid iska furnaa, dhan walba magaalada wa-
xaa u maraysay neecaw qaboow kolkay xaf kugu tir-
aahdo kugu beeraysa aha jirkaaga ku beeraysa nax
ariis iyo deganaan, Waxaa Hûtel Taleex lagu qaban
ayay xaflad aroos ah; Hutelka hareerdhiisa waxaa-
ku safnaa nahal iyo boorar kala cayn ah korna u-
qaadayay bilicda hutelka, dadka agagaarkaa marayay
waxay is waydiinayeen Goaawa qafka ku guursana ah
hutelka? xafladda waxa ku casuunaa marti fara ba-
dan iyo fanaaniin waawayn dalkeenana caan ku ah,
sida: Zulfa.

Bashiir Cali Xuseen ayaaisna ka mid ahaa Fana-aniinta ku casuunaa. Waxaa isagana xusif iyo amaan mudnaa Cabdala Nuura Diin.

Waxay martidu ku soo qulqushay fadhiguna camirmay ayey bilaabat xafladii, jawi heer sae ah ayo ku bilaabatay, waxaana hees laga dhacay ku leeqeeyay Hobalka codka baxsan Sulfa.

Heestaa oo miraheeda ka mid ahaa:

Allahayoow naf daacad ah.

Heestaa aad iyo aad ayaa loo jecleystay, codsi ka yimis martidii aawgeed ayaa mar laba-ad loogu celiyay.

Fu'aad waxaa u dhadhamay Codkii iyo muus-igii wacnaa kuna labnaa Heestii uu ku luuqeyn-ayay Hobalka.

Fadhiga ayuu ka sara joogsaday, wuxuuna hadiyad u geeyay Hobalkii; mar uu soo dhex marayay Martidii faraha badnaa buu eegay dhan-kiisa bidix, waxaa meel gees ah uga muuqday muuqaal aad u quruxsan, waayadana arag. aragee-dana u baahnaa.

Marka ugu horeysa wuxuu rumeysan waayay warbixintii ay u soo tebinayeen indhihiisa.

Indhihii buu mer-meray, misna wuxuu u dhaq-aaqay dhankii iyo hobalkii, hadiyadii buuna u geeyay, markuu ka soo laabtayna wuxuu istaagay meel ku aadan muuqaalkii u muuqday.

Wuxuu malbaba eega inantii waxay noqotay Aamino, wuxuuna iskula hadlay "Walee Aaminooy, cawa dhalad haddaan ahay, woli kaama calool go'in, wuxuu caadil kuu qoray lama celin kar-ayee, wuyuhu dhibadanaa, dhawaanahanba waxaa jacaylka caynaanka u hayay maalka.""



howshii buu wadi waayey, jawaabuu celin waayey keli buu isla faqay, xafladii ayuu dibada uga soo baxay.

walee taa waxaa iiga wanaagsaneed iney xumaato
toos ah iigu bareerto waran ii qaadato
sidii habar curalkeedii gaari kala gooyey
loosoo sheegay, buu badweyn murugo ah bartanka ka galay.

heesaha iyo muusiga dhacayey dhug iyo dhag toona uma laheyn; naftan iska hoogtay oo ka soontay raashinkii gidaarada seexaneysa tolow yaa u geestay dhibatada?
labadii dakka iska xusha kuwo kala dila ma wayaan

asxaabtiisa ayaa dibada ugu timid waxeyna weydiyeen ?? maxaa meesha ku fadhiisiyey kaligaa?"

cabdirsaaq oo ka mid ahaa asxaabtiisa aadna isugu dheeraayeen wajigiisana ka aqristay ayaa weydiiyay waxa ku dhacay.

"warsaaxiib bal ii sheeg waxa kugu dhacay iyo sida wax kuu heestaan"

Fu'aad oon jecleen inuu is hortaago hadalada saaxiibadii ayaa u bilaabay sheekadii

"waxaa habeen habeenada ka mid ah iigu yimid gurigeyga anigoo jooga saaxiibkey aadan yare
waxaana halmar iskala soo baxnay aqalkii goor
ay been ma sheegtadu ku dul gariireysay
7fiidnimo, waxaan basaska magaalada ka shaqeya
iskala soo raacnay wadada gurigeyga u dhow

waxaan baskii kaga gaday Dabka, saantii ayaan hal ii is kalaqaadanay dhamr taalabo kadihha waxaan soo gaadhnay aqalkii xiligaana joogtay Muxubo iy gabar lagu magacaabayay Aamino, Saaxiibkay laHadi gabdhood ayyu halkii igu baray, waloow ay ahaayee laba gabdhood co aan kala dhicin.;Quruxdooda int kadhimana ay ku soo kabeen labis aad u heer sare eya.

Habeenkaa wuxuu ii noqday mid farxadeed, anigo on islahayn nasiibkaagaa kuu ogolaan;gabar ay hee rkan quruxdeedu gaarsiisan tahay, Aamina si wanaag san bay ii soo dhawaysay;sheeko guud baa nadhex - martay una badnayd is barashadeena.

Aamino waxay lahayd muuqaal aad u quruxsan; indhahaaagu markay qabtaana ma ogolayn in ay kasi-i jeestaan.



Aqalka ayuu iigu yiimid si wadajir ahna ugu soo baxney kuna soo t labsanay wadadii.
si aan ugu raacno Bas. Wadii dabka baan Kaga deganay koostarkii, inagoo sheeko xiiso leh inoo socota doodna na dhex taala dhawr sekon kadib waxaan soo ga rney aqalkii muxubo gabar yar xaafadda daganayd xiligaana banaanka taag-neyd u yeernay kana codsanay inay noogu ye.r-to muxubo inantii isha hortaagin codsigeena weyna naga aqbashay in yar kadibna waxaa noo timid muxubo inteysan nasoo gaarin aniga iyo saaxibkey weydiimoyin fara badan ayaan madaxa iskugula jirney waxaana ka mid ahaa hadii ay gabadha sidii iyo si la og u qaabisho sideo-baan ugu soo bandhigaa arimaha jaceyl ee aan laabta ugu guntay.

waxaan u diyaar garoobayey sidii aan xiriirka ugu jari lahaa amaal,xiriir wanaagsan naga dhaxeyn jiray.

waxaan laheen balan waxaana ogsoonaa inoysan ka maarmeen aqalkeyga ee aan ku sugo.

tolow maxaan xiriirka ugu jaraa oo aan ku qabsadaa, aniga aqaan waxey xiriir la leedahay wiilal kale oo ay igu dulwadaa.

waxey ii timid subaxnimadii waxaana la socod siiyay inuu sii socon doonin xiriirkeena.

wax walibana lee yihiin meeley ku dhamaadaan marka aniga jaceylkaaga dhangeyga waa uu ka dhamaaday, hana isxumeyn ma weyneysid wiil asaagaa ee aad ishanataan.

anagoo isla doodeyna waxaa noo yimid saxiibkey aadan oo aan balansaneyn.

dhoor jeer bey damacday iney igu soo cel celiso xiriirkeeni weysa ku hungowday.

anigana waan iska dhaga tiray.

waxey u yeertay aadan si uu inoo dhax--dhaxaadiyo.



aadan waxaan la socodsiiyay inuu qofkan jaceylkeedu iga dhamaaday.

saaxiibkey waxa , uu ogsoonaa halka leyga taabtay lamana socodsiin halka ey arintu mareyso.

Amaal iyadoo careysan bey iga tagtay iguna tiri goor kale oo aad dagan tahay baan kuu imanayaa hadalkaa waan iska dhaga tiray.

intaa ka dib sho kadii ayaan halkii ka sii amba qaadnay aniga iyo saaxiibkey.

ceeb bey ila noqotay inaan saaxiibkey la socodsiiyo inaan jeceelahay gabadha aan mar qura arkay, dhoor jeer baan sheekooyinkeeda ku soo qaad qaaday wax jawaab ahna kama helin, waxaan marwalba soo xasuusanayey booqashada aan ku tagi laheyn xaafada Aamino.

waxa ila fogaatay habeenimadii waqtiguna ilama socon waxaan marwaliba canaan u soo jeedinayey qoraxda kuna ceedeynayey inuu waqtigeeda dhamaaday.

Waxey saacadu koli xamaarato bey ku soo dul istagtay 7 habeenimo, waxaan u diyaar garoobay si aan u oofiyo balanta aan la lahaa saaxiibkey aadan.

Waxay ahayd gabar hilib iyo hanaan dumarnimo ilaahi

dhameeyay.

jooguna waxuu ahaa meel dhaxaad dhrir raacsan mana

lahayn waxyaabo quruxdeeda wax u dhimi kara markey

ku eegeysana waxaadan ka bogan karin wajigeeda suub

iyo dhabanadeeda shuban seenyaheeda giir giiran, ind

heeda dusheeda ku daliigan, ilkaheeda cad cad iyo ci

dkeeda madaw qorteeda dheer iyo dimaheeda gadaal

u daadsan gacmaheeda midabka sare ee xaada leh, kuba

xagal ilaaiyo 100 inta u dhaxeysa leysku sar gooyay

intaa waxaa u sii dheeraa habsami ay talaabadda u

qaadeyso iyo dabeecad wanaagsan wax looga meel

dhiga aanan jirin.

waxaan wadda sheekeysano ayaa saxibkey naga

soo kaxeeyay anigoo aan raali ka ahayn dhawr

jeer baana damcey inaan balan xirto misna

waxaan dib u xusustey laabteyduna ku qabobsadey

inuu saaxibkeyga garanaayo gabadha inyar kadib

waxaan ku soo talabsanay wadadii ceeb beyna ila

nogotay inaan saaxibkey u sheego gabar aan mar

qura akrgy waan jeeclahay inaan ku irdahdo

balan baan xiranay habeen wanaagsan iyo habeen

wanagsan baan isku macalasameynay.



horta gabadhu armeysan rumeesneen jaceyl iyo jiritankis

oo hoodaan dheer ka duushaa, haddii ey taa rumeysnen

ma saaxiibtinimada iyo wada socodka dhalinyarada

miyey dafi kartaa.

intii aan weydiimo yirkaa iyo kuwo kale oo la mid ah

madaxa iskula jiray bey Muxibo timid.

salaan macaan kadib inagoo sheeko ku sii fogaan ayaan

weydiyay Aamino halka ey caawa jirto.

Muxibo waxey noogu war celisay iney xafada joogto.

wey noogu yeertay;

armuu jawigan macaan horchac u yahay siina sadalinayaa

guusha aan halkan kala galban doono.

intaa kadib waxaa noo timid aamino oo ku socota

socodkii iyo xaragadii lagu yaqiin, salaan macaan

oo laabteyda qaboojisay bey nagula soo dushay.

salaan kadib waxey bilaawday iney sheeko daadihiso.

waloo sa cadii ku dhaafta dib kuguna soo noqoto

fursadana halaan caawa iska luniyo ilama ahe

iney isoo mari doonto mid la mid ah amaba u dhow

inuu iskula hadlay buu isna bilaabay inuu ugu

lu qeeyo ereyo macaan.

waxaa inta balan sheekada daadihinayey Aadan, markii

danbana koonay iney aniga iyo Muxibo sheeko isugu

baxdo meel gooona ay isla tageen.

Aniga iyo Aamina ruux awaliba sheekada

wuu la gambanayay, walcow aanu aheyn dad isku cusub;.

Nasiib xumo anigoo habeebkaa wax gu'l ah kala soo galbin, ayaan ka soo tagnay, inagoo balan xiran.

Waxaanse laabta ku qaboowsaday weli in aan fursad kale heysto, inta uu joogo Saaxiibkey Aadan.

Saaxiibkey waxaa uu ila socodsiiyay, iney Aamina lafteedu i doondooneyso, kana lo xleexaneyso sidii ay iigu soo bandhigi laheyd; Saaxiibkey waxaa kale oo uu ii sheegay in Muxibo iyo aniga caawa oo dhan ka wada hadleynay, sidii aan ku hagaajin laheyn xiriirka ka dhexeeya Aamina iyo Fu'aad.

Aamina lafteeda ceeb ayey ku aheyd in nin ay mar qura aragtay ay ku tiraahdo waa ku Jeclahay.

Labadeenu ruuxba ruuxa kale wuu ka daraa, yaase noo kala warama?, laba kala barisay kala warla'; intaa kadib waxaanu nimid Xaafadii, waxaana balanaya Habeenkii xiggay, si aanu u oofino balantii, intaa kadib waan kala tagnay.

Maalintaa wax aan dareemay farxad aan waayadan i soo marin, wakhtiguna si fudud buu igu dhaafay, markii la gaaray magribnimadii ayuu Saaxiibkey Aadan iigu yimid Aqalka, waxaana tusay meeshii aan u diyaariyay artida Caawa, Goor uu wakhtigu uu tilmaamayay Sideedii fiidnimo, waxaa noo yimid Muxibo iyo Aamina oo isla socda, xirnaana labis aad u heer sareeya, jacan qaad xarago leh, salaan macaan bey nagula soo dushay.



Salaan kadib, Aqalkii ayaanu soo wada galay, fadhi la i noogu tago galay ayaanu fariisahay, hal cabbaar ah kadib waxaan u sarú joogsaday in aan u keeno cabitaan, waxaana u shiday, waxaan u soo dhawe yay Maaweeliyaha anigoo u soo dhaweeyay oo aan u shiday, waxaana ka soo dhex baxay cod nimeed, debeesan, aadna u macaan, dhalintii waxay is weydiiyeen, Waa Kuma Hobalkan?

Waxaase markii dambe la isku raacay in uu yahay Xasan Aadan Samatar, iyo Heestii.

Haddaan qiro runteydoo
Jotonsho warkeyga
Ruux aab kugu qiyaasoo
Kala geer dhigaayaa
Kama qaadin indhahoo

Markii aanu dhowr daqiiqo si wada jira u dhegeysaneynay Rikoorkii ayaa la is magli waayay, waxayna sheeko isugu baxday, horena Sheeko u wadaagi jiray Aadan iyo Muxiba, Aqalka ayey iskala soo baxeen iyagoo sheekadii wata, rabeyna in ay Qof kale ku wehliso, waxay fariisteen fer bi meesha ka yiilay sheeko yinkona ku wanaagsanaa.

Waxaa aqalka ku soo haray aniga iyo Aamina, Ma qalbi nabar ku yaalaaa qabooba mise qufac iyo kalagacebaa midba qarsooma? Aamina waxay is tirir aad qarsatid arrin ah oga, mudana kuu qarsoona; waxaase ka tan badiyay jacayl.

Aaminooy, oraah caalami ah ayaa tiraahda Indhuhu waxay arkaan ayaa u qaali ah, niyaduna meeshey rabtaa lagu nasiin karaa, hadaba ruuxa markuu dhalinyarada yahay waxaa la soo gudboonaada waxyaabo fara badan

haba u badnaadeen arrimo jacayl, guushiisuna tahay Guur, haddaba noloshu ma dedo illaa ay hesho ruuxii kula qeybsan lahaa xiriir macaana ay kala geli lahaayeen, dareemahaaguna qaban lahaa, illeyn baadi goob ayey ku magan tahay.

usuus gaaban kadi b iyadoo la dhacsan Fu'aad, jacayl horena u qabta, ayey tiri;

""Ruuxba ruuxbaa lagu raali geliyaa, ruuxna indhahaaga lagu raadasadaa, biyana dab lagu baa lagu diiriyaa, adigana aragaaga aysan ku ildoogsadaa, ee Fu'aadow, ma nogon doontaa midka loo han weyn yahay? himila iisu wacan tahay? hiyiga iyo laabtu hoybiyaan?.""

Markii ay erayadaas ku hadleysaya wejigeeda waxaa ka muuqday dareen jacayl, indhaheeduna waxay ku magnaayeen xusuus dheer.

Xiise waa dhamaadaa, dhalateed waa wax aan jirin; jacaylka dhabta ah waa midka aan duugoobin,.

Waxaa mar waliba igu dhiirigelinayay, in aan wadaanta u rito webiga jacayl ee agteyda dur-duraya, qosolkii iyo dhoollo caddeyntii Aamina markii dambena kaanay in aanu hor jacayl ku wada harsano.

Aamina waxay iigu cabatay wakhtiga oo ciriiri ku ahaa waxaanse laabta ugu qaboojiyay, in aysan wakhti weyn labadii is jecel, "Waxba yuusan ku ciil, ciriirina ku gelin wakhtiga, farxad baan wejigeeda ka aqristay, wax ana ka aqriyay wejigeeda in aysan ka baqin dhankeega, tii naftayda la saaxiibtay, dareenkeygana u diyaar ahaa in uu dabaal baro, waxaan iskala soo baxnay Aqaalkii, inagoo moodeyna in aanu wada joogno sekono



rn, goor ysadana waxay sheegeysay kow iyo tobanii habeenimo, waxaan u nimid Aadan iyo Muxiboo, oo wada jooga, waxaanu ku soo talaabsanay wadadii anagoo sheeko wadaageyna; waxaan u wada soconay laba laba socod gaabana waan ku soconay, waxaan lug ku soo marnay meelo badan oo aanu maridoogta caan ku ahayn; tallaabo dabeesan, iyo socod ku saleysan saalqaad xarago leh, ayaan isla qaadeyney; waxaa noo soo muuqatay Xaafadii Aamina.

Noloshu waxay ku dhisan tahay Jacayl, nolosjacaylkuna waa nolol; waxaan halmkaa u abbuurnay Ubax si aanu u gurano miribii ka soo baxo, qof kale aaney inoo la qeybsan.

Intaa kadib waxaan ku balanay habeenka xiga in aan ugu imaado Xaafada, .

Saacoydii baan dib ugu soo laabatay anigoo doonaya in aan gaaro gaaro Gurigeyga, markii aan criirta korayna waxaa ii shidnay Filim anigu iyo nafteyda nagu koobnaa.

Waxaan soo toosay Subaxnimadii, anigoo danno ka lahaa magaalada, waxaana ka soo rawax ay Duhurnimadii, qado kadibna waxaan isku diyaariyay in aan gam'O, markii la gaaray magrib nimadii ayaan ka soo toosay, si aan u oofiyo balanta Caawa.

Waxaan ku soo talaabsaday wadada hir marta Gurigeyga, waxaana habaankaa moodayyay in aan ka dheereeyo bassaka magaalada, dhowr jeer baan damqay in aan isaga dego, waxaana kaga degay wadada dabka, oo aan goobtii balanta sidaa uga sii fogeyn.

Ruuxii Dumar ah ee tallaabo qaadaba waxaan moodayay Aamina, waxaase ii muuqday muuqaal aan ku farxo dareenkeygana ii diiday in aan meel kale u duwo. Salaan kalgacatooyo, ayey i gacan qaaday, inagoo sheeko wadaageyna baan isla soo qaadnay tallaabadii, inagoo habaneenkaa ku sheekaysanay jardiino ku tiilay Hoteel Curuba. harerahana ka xiggeen Uban coynb-ceyn ah.

Waxaa nagu soo dul dhacay Ubax, inagoo sheeko wadaageyna, waxaana soo qabtay Ubixii, oo aan u dhiibay Aamina.

Habeenkan wuxuu ii noqday mid farxadeed, waxaan sheeko wadaagno, ayaa inagoo aan is oheyn dhunkasho kalgacal dhabnada is dhaafsanay.

Haddii aanu hal cabaar ah joognay ayaan u mariyay geeraarkan.

Markuu xeysku hooro
Xooluhuna cararaan
Sida loo xamdiyo
Alle loo xushmeeyo
Adna kuu xushmeeyaa
Markaad tiraahdo Xabiibi
Anna iraahdo xayaati
Xan-xantoodaa
Xididada jirkeygana
Xaadu istaagtaa
Wax xaawaleey taan
ka xushaay xaasid yuu
ina kala dilin
Ee xaafi xiisaha jacaylka.

Waxaan ka soo kacnay jardiinadii, intii aan wadada isla tamashleyneynay ayaana balan kala xiranay, habeen wanaagsan ayaana hadal isku kaaya dambeysay.

Waxaan imid Xarfadeylii si aan u gam'o, intaa kadib waaga ayaa ii baryay, maalintaa-oo dhan kama soo bixin gurigeyga, waxaana jiray qaboow aad u macaan; kama dhashay xagaagii ku da ay hagaalada iyo hareerahooda; waxaan qorsheystay in aan sameysto madadaalo gaar ah. waxaan soo qaatay Rikoor, iyo cajalado isgu jiray Soomaali, Carabi iyo U.S.A.



Waxaan dhoowr daqiiqo dhegeystay hees Soomaali ah aadna u macaaneyd, kuna luuqeynayay Salaad Maxamed Sharci.

Markii aan dhowr daqiiqo dhegeysanayay, baan misna soo xusuustay dariiqad kale oo i xiise geliisay, fadhigii ayaan ka sare joogsaday, waxaana u soo dhaqaaqay dhankii Buugaagta, waxaan kala soo baxay Buug sheeko ah, tijaabana iga ahaa laguna magacaabayay Ma Guraa Jacayl Guur Waa Sidee??,

Buuggan markii aan dhoowr baal aqriyay wuxuu i dareensiiyay dareen jcayl horena ii taabtay, intaa kadib waxaa la soo gaaray xilligii Qadada, markii aan cunteeyayna waan gam'ay, waxaana soo toosay aqribnimadii si aan u oofiyo balan aan la lahaa Aamina.

Habeenkaa wuxuu ahaa mid ka macaan kana qadarin sareeya kana qurux badnaa intii aan wada soconay sheekana wadaageyray Aamina, waxaana Gaari ka soo raacay wadada hor marta Gurigeyga, Gaarigiina waxaana ka ga degay wadada Dabka, waxaan istaagay meel ku aadan goobtii balanta, waxaan markiiba xusuustay in uu jacaylku yahay illo ka soo burqada qalbiga qofka,agagaarka wadnaha.

Waxaa ii soo muuqday muuqaal aad u bilicsan, waxaan is weydiiyay,"fellow, gabartu ma Aaminaa? mise waa saber u ogi?" Indhaheyga ayaan canaan u soo jeediyay anigoo ku eedaynaya warbixinada qaladka ah ee ay si soo tebinayaan.

asiib wanaag Gabartii waxay noqotay Aamina, salaan qaali ah kadib waxay ii bilaawday in ay sheeko igu madadaaliso, habeenkaan wuxuu ii ahaa mid ka macaan intii aanu wada soconay, una wada muudsaneysaneynay kalgacalkii kelida inaga dhigay, noona diiday in ay qof kale sheeko nagu wehliso.

Kuleylkii faraha badnaa ee habeenkaa ku soo kordhay jacaylkoona, jiibka cuslaa, ma aha mid ka dhashay wada jirkoona caadiga ah, waxaana wada laabkiciyay kala fogaansho ku soo kordhay Aamina, laftigeyga ma ogoleyn in ay ku noolaato meel aanu ku noolayn mataankooda Caashaqa, habaankaa oo dhan dardaaran ayey inoo aheyd. wax la dardaarmo bey Saacadda saacad u dhiibtay.

La yaab malaha naftan, hogtay hareereeyay acaylka hilmaamsiiyay wakhtiga, xabiibi hadaan nafta la xukumin waxay ku boodaa wax aan la rabin ee aan samirno.

""Aaminooy, waxaa tahay Ubixii noloshayda, sidaan u saadaaliyay in ay noqondoonto Shamicii Gurigeyga."" ayaan u sheegay.

Intaa kadib waxaan ka soo kacnay Derbigii maqribnimadii aanu fariisanay, xilliguna waa Saqdii dhexe ee Habeen,

Aamina subaxdii safar bey aheyd, iyadoo ku sii jeeday Gobalka Mudug, ayna wehliyaa Hooyo Safiyo.

""Fu'aadoow, aniga waxaan maqnaanayaa Sadex sbuuc, ee Sadexdeeye yaanu inaga faa'iideysan. Aadigana ha iloobin, dantuna waxa jir weeyee dhankaaga yeey ka beylihin anna teyda i u daa."" ayey u tobisay.

""Aaminooy, adna wacadkeena ha iloobin inta aad maqan tahayna naftu wey samreysaa, yaana aqbaar kaa waayin, waaraaqahana aan kaa helo."" ayaan ku celiyay.

""Gacalo, nabadgelyo...Nabadgelyo....""
ayaan ku macsalaameyay,.

Aamina iyadoo igu indho maraamarsay ayey Gurigeeda ku libidhay.



Saanteyda ayaa aniguna dib ugu soo laabtay, anigoo uu i qariyay hami, iskulana hadlaya, "ma cirkaan kuna duulaa Dhulka ma dhigi karayee? ma dhabtaan ku heystaan, maya...maya .. waan ku kalsoonahay in aysan nin kale iga raacayn.".

Waxaan soo gaaray Guriigeyga, waxaana i bilaabmay riyyooyin qiyaali ah, horteydana waxaa imaaneysay Gabartii aanu saacadaha is moogeyn, dhadhalaal is iyo ileys qurux badan ayaa i soo hor muuqday, wejigii qirxoonaa iyo jirkii sinaa, iyo saanqaadkii xaradda lahaa ee ku saleysnaa ayaan ka hirdi waayay. Ma quur xalaal ah baan kula dakeyn doonaa?Ma jacayl xalaal ah baan iskula dabaalan doonaa? Mise dooni badweynta daqalla kaga jabay ayaanu murugo ku dhex m aquuro doonaa"Maya..Maya..naftedu waa ku kalsoon tahay qof kasta oo dahci inuu danteda ku sameeyo daraasaad cilmi, Hala hor tegi qalbi saafi ah iyo niyad bir ah,.

Waxaan ku soo baraarugay anigoo farxad iyo murugo ay ii saamaysyeen, waxaanse ogaaday in Baamurugo ay ii saameyeen, waxaanse ogaaday in Baa wa oo dhan riyo dhex dabaalanayay, waagii ayaa ii baryay.

Aamina iyo Hooyadeed waxay goor hore isku soo diyaariyeen gaadhii uu wadan ka bixi lahaa, waxayna raaceen Baskii ugu horeeyay.

Aniga waxaan u soo qalab qaatay meeshii uu Basku ka bixi lahaa, markii aan goobtaa imina oo aan weydiiyay dadkii halkaa joogay, waxay iigu waroeliyeen in uu Baskii Aroornimadii Saakay ka caggo qaatay goobtay.

Aamina intii ay Baska saareyd, siina dhex mareysay Tuulooyinka, iyo Degmooyinka wax miir ah ma laheyn, qabkeeda uun baa saaraa Gaariga

mana daawaneyn dhirta, xoolaha iyo Ugaarta ay caanka ku yihiin dhulalka Soomaaliyeed.

Aamina Baska waxay ka saareyd kuraasta dhexe, kuwooda daaqada xigga, waxay dhex maquureysay badweyn murugo ah; is xusuusin xubiyo faceyn, biyo siin Ubixii ay beertay in ay ku ilsdoogsato wakhtigan oo kale.

Waxay durbadiiba xusuuxatay in uu Ubaxani ka kobcay nafaqaynti iyo daryeelkii barbaarineed.

Waxay ogsooneyd in uu jacaylku u baahan yahay kalsooni iyo dulqaad adag.

Aamina markii ay Gaalkacyo tagtay, joogtayna maalin qura, ayey raadisay meelaha Waraaqadaha lagu soo hagaajiyo, waxayna u soo qortay warqadan;

Ku:Fu'aad
L/H.Xamar

Gacaliye, iga hanti salaan aan sir laheyn, samo iyo wanaag badan; sida sagal aroorycad baan samada kuu soo marine, ee samo iiga gudoon saafigaan jeclaayoow.

Marka xigga caafimaadkeygu aad buu u heer sareeyaa, wax aan tabanayo oo aan adiga aheyna ma jiraan. ee adigu samo ma ku nooshahay silic ma ka nabad qabtaa? saqda dhexe habeenkii, adoo sijinka guuroynaya soo toos ma is tiri? saxansaxo udgoon badan iyo soowd jacayl ma ,aqashaa? waxbo aadan sine u garaneynay ma kuu sacabo tumaan? ma soo toostay saliga ma qabsatay? sidaa ayaan ku noolahay ee hadalkaaga ii soo duub, si aan indhaha ugu maaweeliyo, qalbiga-



na ugu dejiyo, sawirkaaga ii

sawirkaaga ii soo dhiib si aan indhaha ugu maaweeliyo, qalbigana ugu dejiyo. suuradaada saanteedaa qalbigeyga ku taaloo, kaama seexdo ha iga socdaalin, safar dheer ha iga aadin. samadaan ku noolnahay sawirkeeda ha dhaafin, ee dhex sabee eligaa, kaama seexdo ha iga saluugin, isa marsii sekol waliba, sadrigo iyo laabta sawa xan baa ka waxayee ku saleysan samaha aan, aan ku sifoowin xumahaaga, saabley da oo idil wey kuu sacabo tumayaan, soo soco ku leeyihiin si kastoo ay ahaatoo saban walboo la joogo la soco waan ku sugayaa.

Gacaladaada
Aamina

Saddex cisho kadib warqadii Muqdisho ayey timid, markii ay warqadii i soo gaartay dareen wadayaasha jiirkeyga farxad ayey la wada gariireer waxayna ku sigteen in ay shaqada joojiyaan.

Howshii baan wadi waayay, meel aan joogo baan garan waayay farxad aawgeed, Alla dhambaal wanaagsanaa innaantu, waxaan durbadiiba furay warqadii waxaana aqriyay dhoowr jeer, anigoo aan moodeyn in aan mar kiliya aqriyay.

Waxaan go aan ku gaaray in aan u jawaabo waxay iga soo codsatayna u raacio warqadan, qoraalkeygiina waxaan ku bilaabay.

Ku:Aamina
L/H.Mudug

Gacalo:

Waxaan salaan kuu soo marinayaa hawada u dhexeysa Muqdisho iyo Gaalkacyo, salaantaa oo si sahal ah uga soo siibatay xubin waliba oo jirkeyga ka mid ah, salaan kadib waxaan kuu sheegayaa in uu caafimaadkeygu uu aad u heersarreeyo, wax aan tabanayo oo aan ildiga aheyna ma jiraan,

Gadaliso warqadii waan helay, wixii ku qornaana waan fahmay, wixii aad iga soo codsatayna warqadan ayey kuula socdaan.

Gacalo, quruumaha adduunkaa wada qoray in qalbi ja ayl kusan qarsooneyn, qabri in aan galo mooyee qun yar kaagama haro, qool ha i gegalin ha i qatalin nafteyda oo mar uun laabta ii qabooji.

Gacaliyahaaga
Fu'aad

Markii aan warqadaas si wacan isugu habeeyay ayaan ula soo cararay xagga Boostada iyo Isgaarsiinta, halkaasoo aan ku riday Santuuqii loogu tallo galay.



Hurlo aanan hurdin waayadan ayaan habeenkan hurday Isbuucan wuxuu ii noqday mid farxadeed, waxaa subixii Aqalka iigu yimid Saaxiibkey, isagoo aan war u heyn in ay Aamina baxday; waxaanse u weriyay in ay mudo Isbuuc ah sii maqan tahay.

## II

Waxaa anigoo u fadhiya qadada duhurnimada, idaacada lagu sheegay in Gaari ku rogmaday meel ku dhow Beled-weyne, Gaarigaa oo kayid Gaalkacyo, una soo socday Xamar Muqdisho,.

Waxaan u soo dhaweeyay dhegta anigoo si quman u dhegeysanaya magacayadii dadkii saaraa Gaaraarigaa rogmaday,ee dhaawaca u badnaa.

La ma filaankeyga waxaan ka maqnay magacii Aamina oo saddexan, iyo Hooyadeed oo Isbuucan oo dhan la hadal haayay in ay imaan doonaa,.

Waxaa ii biloowdai todobaadkii mugdiga maalmihii ugu xumaa, waxaan garaawsaday in aaney nolosha ku koobneyn in wax la cuno oo la cabo, waxaan moowjadaa ku jiraba waxaan go'aansaday in aan soo eego sida ay wax u gaareen Aamina.

Arooraimadii waxaan u soo qalabqaatay rugta Basaka Magaalada xamar, waxaana raacay Baskii ugu horeeyay.

"Ma weligeey baan Xamar dacalna uga baxay?" ayaan iskula hadlayay, wuxuu Baskii marbameel istaago wuxuu i geeyay Beledwoyne.

Markii aan Baskii ka soo cago dhigtay ayaan garan waayay bar aan hiigsado, dhowr qof ayaanse weydiiyay, dhanka uu Isbitaalku ku yiilay, waxaana ugu dambeyntii la i keenay Isbitaalkii.



Waxaan ilinka isku aragnay wiil ka shaqeynayay Isbitaalka, waxaana la socodsiiyay xaalada meesha i keentay, waxaana ka codsaday in uu i tuso dadkii Gaariga la galibmay.

Wuxuu i keenay qeybta dhaawacyada fudud, waxaan qolba mar eegro buu markii dambe igu yiri;

""Soow, gabarta aad raadineysid ma aha gabar maariin xiggeen ah laguna magacaabo Aamina? oo Ciyaal Banaadir ah.""

""Haa., waa iyadaa."" ayaan la soo booday.

""Gabadhaa anigaa aqaan iskuna wanaagsanahay, oo qeybta aan joogo ayey ku qoran tahay ee ina keen.""

Wuxuu i keenay qol, mise ciddiba kuma jirto, Aamina qolkaa qofna kulama qorneyn, waxaan is weydiinay meesha ay jirto, koleyba meel sidaa u sii fog ma jirtee.

Markii wuxuu ugu yiri; "Halkan ku sug iyadaa imaaneysee." Sariirteedii baan fariistay,.

Jawiga maalintaa wuxuu ahaa mid degan, waxayna dharaartaa ku caan baxday qaboow, maalmaha kaleng ugu faani karto.

Kali baan iusla faqay waxaan is weydiiyay sida ay wax u gaareen,"Tollow, ma dhaawac fudud baa mise waa dhaawac culsu?haddii dhaawac cul s uu yahay lama soosocoteen ,ee waa dhaawac fudud."

sidey aniga ila tahay.

Intaan weydiimooyinkaa aniga iyo maskaxdeyda madaxa iskula jirnay, bey Aamina soo hashay,

Aamina wejigeeda wax'a ka muuqday xanaaq

salaan kadib waxay ila socodsiisay in uu dhaawac fudud gaaray; Laakiin ay Hooyo ka daran tahay.

Anigoo wejigeyga laga aqrisan karo naxdin ayaan ka codsaday Aamina in ay i soo tusto Hooyadeed, si aan u soo arko xanuunkeeda.Laakiin iyada ayaa iga hor istaagtay, oo igu dejisay waa ay iska caafimaad qabtaa,. ee iska joog.

Markii aanu kal cabaar ah wada joognay ee aanu xiise isku booyeeyno ayey Aamina oo uu dareenkeedu is bedelay, iina muujineysay in ay jacayl ii qabto ii marisay tixdan gabayga ah:

Ka dhalandhooloo ma magansaday keymaha
Gudgudaha ma igu helay ma kici kariwaayay
Ma is weheshanay murugoo dudumooyinka ma ila hadlaan
Magaalo ma iloobay iyo adduun.
Ma ka gaabshay qeyrkey ma is waalay anoo fayoow.
Ma tiigsaday geys iyo Cilmi
Ma u socdaa godkoodii ee ogoow in aan
Weli ku jecelahay,ee aan ku iloobin.

Intaa markii ay tiri ayey hadalkii sii wadi weyday xanuun aawgeed, Sariirtii bey kortay waxaana la moodayay in ay naftu ka baxday.

Weligey ma arag ruux ay naftu ka baxaeyso, daqiiqdao kadib wey soo naaxday, waxayna biloowday xusuusin xubiyo fac weyn iyo Ubixii aanu beeray.



Kadib markii aan dhuuxay erayadeedii, dahabiga ahaa, ee aan dhadhansaday weeraheedii qaaliga ahaa ogaadayna in ay ii heyso jacayl qaro weyn, ayaan anigana u celiyay:

""Gacallo, waxaad Aqal ku leedahay eebadaadu ku mudan tahay sambabada agtoodiyo ilinka u dhexeeya, waxaan kuu ishaaray albaabka jannada iyo Udgoonoow rasuulkiyo Illahey agtiisa.""

Kadib Aamina waxay ila socodsiisay in goor dhaw Isbitaalka laga saari doono, oo ay muqdisho u ambabixi doonto, ee iska bax maadaama ay Waalidkey i soo raaci doonaan, hana wer-werin.

Markii aanu sheeko dheer wadaagnay ee aan u soo hinqaday socod xaggii banaanka ah, ayaan maqlay gabay macaan oo afkeeda ka soo baxaya;

Geesigii aan raga ka doortoow
Kii daraadey u dhalandhooloow
Kii aan u magansaday duurkoow
Kii daraadey u adduun ilooboow
Ma moogi arrimahaaga
Kaafna waan ka hadlayaa
Kumaan diidin
Tagna kumaan oran.
Kiishkana adaan kuu guntay inaad furto
Ku kalana isma lihi waa uu firaa
Ee ha wel-welin Gacaliye.

Waxaan aad ugu qancay erayadii Aamina,waxan go'aan ku gaaray in aan ka shiraado Beld-weyne, maalintaa oo dhan jid ayaan ku soo jiray, waxaanse Xamar soo gaaray Habeenkii xigay.

Hadaladii oo dhan ayaan dadkii aanu isku fiicneyn ka reebtay, kalomadaha beenta ahna wanaag baan moodayay; eray kastaa oo la igula hadlo, ha xumaado hana wanaagsanaado dhimbilo dab ah waa iiga kululaa, cunadii ayaan si toos ah u qaadan kari waayay; hurdana haba sheegin, waalidkey baa ila yaabay waxayna go'aan ku gaareen in Isbitaal la i geeyo.

Dawo nooc kastaa waa la igala quustay, Alloow, yaa waalidkiis u sheegga in ay dawo u tahay Aamina oo hal mar u dhoolo caddeysa.

Mar jabkeygii uu fiday, oo dhowr Isbitaal la iga soo saaray, oo dadkii oo dhami ay ka yaaban yihiin cudurkan i haya ayey Aamina ku laabatay Xamar.

Goor magrib ah, anigoo jooga Gurigeyga iigu yimid muuqaal, aad u lilicsan, waayahana aan indhaha ka qaadin, oo aanan arkin, aragee-dana aan si aad ah ugu baahnaa.

""Haye Gacallo, ii waran? xanuunkii ma ka bogsootay? Illaahey ma ku samo keenay? mar dambe yaanan kaa maqal Gobal ayaan aadi. Intii aad iga maqneyd hurdo waan ka go'ay cuno aan cunana haba sheegin."" ayaan ku waaniyay, waxaana u dabo dhigay erayadan:

Haddii aanu isi seegno ifka aanu isku weyno
Waa ayaan daro weyn, aan loo adkeysan kareyn
Leygu kaa ibtil eyoo,yeeynaan is iloobin



Aan kaa oogto adduun inta aanu ku noolnahay
In kastoo jacaykeenu dhignaa intii
Aanu uurka Hooyo ku jirnay
Uuna dhisnaan doono weligii
In kastoo calaf jiro yee naan is
Iloobin.

Intii aan erayadaa ku hadlaya waxaa iga muuqday dareen jacayl, horena ii taabtay, waxaana iskla soo baxnay wolkii inagoo habeenkaa Magaalada u deganeyna.

Ayaanku wuxuu ahaa Isniin, Taariikhdu waxay ku beegneyd 1dii luuliiyo, wadaooyinka magaalada waxaa ku xirnaa nalal kala ceyn-ceyn ah, iyo Boorar bilicda Magaalada kor u qaaday.

Waxaa iyana xusid mudnaa labiskii aanu xirneyn qofkii isku keen arkaana uu niyada iska lahaa Alla isku wanaagsa aa.

Waxaan lu ku soo marnay meelo badan oo aanu maridooda caan ku aheyn,waxaanse ku hakamay Shinoema Xamar, oo uu ka socday Filim aan waadanba ka raadinayay Magaalada, xiisana aan u qabay.

Waxaan soo fariisanay Fadhiga labaad, mana ogeyn in qof kalo sheeko nagu wehliso,.

Filimka intiisii badneyd ma aanan fiirsaneyn, oo waxaanu isku mashquulsaneyn Aamina oo aynaan waayadan sheeko kala qeybsan, mar dambe ayaan isaga soo baxnay Filimkii inagoo ay weli inoo socoto sheekadii, ina dhex mareysay.

Waxaan xiranay balan wax ana isla higaad-inay habeenka Talaadada, waxaana ku kala tagnay Habeen wanaagsan iyo wanaagsan.

Subaxnimadii ayaan u soo degtay Magaalada waxaana kula kulmay Aamaal, oo uu waa hore xiriir inaga dhexeyay, salaan kadib waxay iigu bishareysay in caawa ii imaan doonto; hasayeeshoo waan iska dhego tiray, yaase uga wataman, una sheega in aan Caawa la banasanahay tii naftеyda la saaxiibtay dareenkeyga u diyaar ahaa inuu dabaal baro. Sow uguma heestaan heesta wacan.

Ismoog aqalkii bey asleysaa
Ismana oga
Yaa u sheega Yaa ogeysiiya

Aamaal waxay damacday in ay igu soo celiceliso xiriirkii inga dhexeyn jiray, iyadoo ku haminaysay fursan dan ka faa'iideyso.

Illoow, yaa caawa kaga warama in laha balan san yahay Aamina, koleeyba aqoon uma lahe.

Amaal arrintaas wey ku hungoowday,

Fu'aad wuxuu jeclaa qofkii kala sheekeyta una faaniya Aamina, .

Durkii ayaan ka soo rawaxay magaalada, una luuday xagii xafadeyda, qado kadibna hurdo ayaan isu diyaariyay. Si aan isugu diyaariyo balantii Caawa, aan la lahaa Aamina.

Waxaan ka soo baxay Aqalka anigoo Bas ka soo raaxay wadad hor marta Gurigeyga, saacado ka hor goobtii balanta ayaan diyaar ku ahaa.

Muuqaal aan ku farxay baa ii soo muuqday, darreenkeygguna u qashuucay, salaan kadib waxaan u soo dhaqaaqnay dhankii iyo wadada, waxaana u bandhigay in Maalinta Arbacada uu imaan doono Aadan yare.



Aamina imaanshahaa aad ayey ugu faraxday, waxayna u yeertay Muxibo, oo ay la socodsiisay in uu uu Aadan yare imaan doono,

Muxibo wey ka warqabtay in uu Aadan imaan doono waxayna ku jirtay diyaar garoowgiisa.

Waxaanu habeenkaa ku balanay inaanu si wada jir ah u soo dhaweyno Aadan yare, Muxiba waxay igu tiri, inaga ayaa Subaxda Arbacada Guriga kaa soo mareyna ee igu sug.

Subaxdii Arbacada ayey Guriga iigu yimaadeen iyagoo Gaarigii lagu wado, Gaarigaa oo ay lahaayeen Muxiba Qoyskooda.

Gaarigii ayaanu soowada raacnay, waxaana u ku soo talaabsanay wadada Maka-Al-Mukarama, waxaan shidanay cajalad Miyuusik ah, daqiiqdao kadibna waxaan nimid Gegiga dayuuradaha,.

Dayuuradii weli ma aaney imaan waana la wada sugayay, waxaan soo galnay baar ku yiil eerboorka cabitaan iyo cuno qaboow ayaanu ka dalbanay, intii aanu afka kula jirnay ayey diyaaradii soo cago dhigatay, waxaana ka soo biloowday dadkii.

Intii aaney dhameysan cunteytii, ee ay weli ku jiraan, ayey mar qura ka soo wada baxeen, iyagoo soo beegsaday xaggii iyo bartii ay ku soo socdeen la soo dhaweeyayaasha,

Markii ay indhaha la heleen Aadan yare oo ku dhex jira dadkii faraha badnaa ee dayuurada ka soo degay, ayey bila been gacan haadis,.

Amintii uu si quman u arkay axsaabtiisii oo sugi la' ayuu orod ku soo dhex jiiray, dadkii hareeraha ka xigay, wuxuuna soo gaarsaday iyagoo xaggiisa u soo ordaya, markii ay meel dhexe ku kulmeen, ayey dhunkasho midba mar ah dhabanada is weydaarteen, waxayna soo qaateen Baabuurkii ay

wateen.

Wareysi bey isugu dhaqaaqqeen, intii uu Gaarigu dhex mushaaxayay wadada, wuxuuna uga waramay dhulalkii uu soo maray,.

Intii aaney sheekadaa dhammaan ayey Gurigii Aadan yare soo gaareen, Baabuurkiina waxaa la qotomiyay bartaa, halkaasoo ay Muxibo ka codsatay Aadan in uu habeen dambe ugu yimaado Xaafada,

Aadan yare iyo Aniga waxaanu ku harnay Guriga hablihii iyo darawalkoodiina waa is raaceen.

Anigoo aad ugu xiise qabay Saaxiibkey Aadan in aan la sheekeysto, ugana waramo taariikhdii jiilka dheereyd ee aanu isla soo qaadanay aniga iyo Aamina, ayuu intii aanan u bilaabinba i weydiiyay, halka uu xaalku marayo.

Saaxiibkey waxaan uga waramay dhamaan dhacdadii aan la kulmay intii uu dunidaa ku maqnaa, waxaana u caddeeyay in hada ka hor uu mataanteyda uu la qalibmay Gaari ayna gashay Cisbitaal, waxaa kaloo aan u wariyay i in Ubuxii aan beeray uu bislaaday dhawaan aan ku reko weynahay in gurto mirihiisa.



III

Waxaa wiigan Aamina iyo Waalidkeedba iskula doodayeen in Aamina lagu daro Mustafa, oo ina Adeerkeed ahaa, Goor dhawna dalka yimid.

Aamina Aabeheed iyo Adeeradeed ayaa go'aankaa soo gaareen, waxase mar walba is hortaagayay, kalana soo hortjeelay "Gabadheyda doqqeeda yaan la lumin Wiilkii ay keensatana ha lagu daro." Hooyo Safiya go'aankaas waa lagu raaci waayay, waxaa goor Aamina u yeertay Hooyadeed una sheegtay go'aanka ay soo gaareen Adeeradeed, waxayna ka codsatay in aaney is hortaagin hadalada Waalidkeed.

Aamina hadalkaa dhegna uma dhigin waxayna moodesay, madadaalo iyo kafatan,. Mar kale waxaa xilligii duhurka u yeeray Aabbeheed oo fadhiyay Qolka qadada, wuxuuna u sheegay go'aanka ay soo gaareen, oo ah in lagu daro Mustafa, laguna meheerin doono wakhti aan sii durugsaneyn.

Aamina dhowr jeer bey damecday in ay iska dhega tirto hadalada Aabeheed, ""Aaboow, dooni maayo wiilkaa oo iga daa."" ayey ka codsatay. wuxuuna ku celiyay:

""Aabbe, waxaad doorataa far duco iyo mid habaar.""

Markii ay soo mari weyday ayey biloowday in ay isla hadasho iyadoo kaligeed ah, waxayna iskula hadleysay:

Hadal Waalid madiidi karo
Habaar adag buu dhalaa
Heyraarta ma yeeli karo
Jacaylkuna wey hayaa

Fu'aad iyo aniga intii aanu kala fogaan laheyn waxaan ka xigaa habaar, marwo kalena noqon maayo.

I  Illeyntaladaan la ruugin waa lagu rafaadaaye Aamina waxay iskula hadleysay."Toloow, ma talada waalid baan qaataa, oo waxaan iska ridaa indhaha, mise Shidaalkii naftedaan raacaan oo waxaan garbbo saartaa habaar."

Tallo gudcur bey ku noqotay, waxaa la nikaaxi rabaa isla habeenkan, waxayna la balan san tahay Shidaalkii nafteeda.

Waxay ay sameyso ayey garan weysay, intii ay jeejeesaneysay ayuu wakhtigii galay, waxaana loo soo fariistay gogoshii lagu nikaaxin lahaa,.

Marar badan ayey isku dayday in ay ka dhaarato, laakiin baqdin ay Aabbeed ka qabtay ayaa ku kaliftay in ay iska aamusto.Halkaa ayaana lagu mehersaday.

Waxaan soo istaagay bartii ay balanta iigu dhigtay, kama aanan warqabin halka uu xaalku marayo ee mar walba saacada ayaan eegayay.

Markii ay saacadu dhaaftay labasaac in ka badan ayaan is weydiiyay ""Aamina weligeed balan kuuma go'yn ee Caawa maxaa helay.Waxa baajiyaya maba sahlana.Tollow, xaggee biyuhu ka qaraadeen fiiladuna ka go'an tahaY?."



Haboonkan intiisa badan feker ayuu igu dhaafay, waxaan subxiii is aragnay Saaxiibkey Aadan,ila socodsii in aanu Caawa aadi doono Xafada Muxibo.

Waxaan u sheegay in aanan waxba ka qabin, Caawa ayaana balan dhiganay.

Heeheenkii markii la gaaray ayaanu isi soo raacanay, waxaana la kulanay Muxibo,Salaan kadib intii aanu sheekada ku fogaan ayey inala socodsiisay in Aamina lagu daray ñin inna Adeerkeed ah.

Murugo ayaa igu soo duushay, naxdin ayaa i gariirisay, wadnaha ayaa la i qabtay, meel aan joogo ayaan garan waayay, dhulka iyocirka yaa hal mar ila wareegay, jawaab ayaan celin waayay.

Muxiba waxaa kaloo ay inala socodsiisay in uu Waalikeed ku qasbay oo aanay iyadu raali ka aheyn, laakiin marna niyadayda ma galin Aamina ayaa ñin kale kaa raaceysa,. Toloow soow ugaga luuqeeysoyn heesta tiraanyada leh ee uu ku luuqeeyo hobalka Bashiir Cali Xuseen.

Axdi been ah laga galo
Wacad lama ilaabo
Dadna ruux ku aaminay
Lagama indho saabto

Inta badan haboonkaa waan ka dhego la'aa Sheekadii dur-durka aheyd ee dhex mareysay Aadan iyo-mataantiisa. waxaana hoosta kalahaa;

Gabartii aan isku haleynayay
Gabadhii aan dumar oo dhan
Dareedeed u iloobay
Gabadhii aan isku haleeynayay
Gabadhii aan daboo caddeeda ka helay
Gabadhii aan Guurka ka rabay
Ma sidaan baa ii lambeysay
Idleeday e iilka ii qarda.

Cunadii si toos ah ayaan u qaadan kari waayay Waalidkooy baa ila yaabay dhoowr jeer bey dambeen in ay Isbitaal i geeyaan,

Ma jacaylbaa dawo leh, yaa waalidkii uga waramo in ay dawo u tahay Aamina oo mur uun u dhoolo caddeysa.

Aamina waxaa la geeyay Aqalkii loogu tallo galay oo ay marwo ka noqon lahayd.

Ma Aamina ayaa abuurtay Jacayl kan ka horeeyay? Jawaabtu waa maya. Aniguse waxaan ogsoonahay in jacaylku dad badan u-geeriyooday, sida Qays iyo Leyla, Cilmi iyo Hodan, Cantar iyo Coobla iyo wiiil soo raacaba.

Dhoowrjeer ayay asxaabteydu isku dayeen sidii ay iiga bachi'in lahaayeen jacaylka Aamina. Ma Jacaylbaa sahal ku baaba! Saaxiibkey Aadan gare ayaa igu yiri: "Saaxiib iska ilooway Jacayka Aamina. ilayn waa qof la guursaday ee, waxqadna ogaantaa in jiraan hablo ka wanaagsan."

""Saaxiib hablahaa kale isheydu ma qaban weliba waxaa ii muuqda Jacaylkii aan u qabay Aamina. Haddaanu gubarnimo igu dhaaf-fana garoobnimaan ku sugayaa, haddaan ifka isku weynana Khiyaamahaa noo balana haddii laysku arkayo.""

Hadaladii la ii soo bandhigayay waan iska dhego titayay, kali baan iskula hadlayay sidii wax waalan, waxaana isku hiifayay:

Ciilkan aneys baday
Carmal dhintay baan ahay
Calafkeygu waa lumay
Caashaqeygii lumay baan
Ceynkiisii Looyahay
Cishadii Aamina la aroosay



Baan ciil la ooyay
Maantey igu ciyaartoo
Waa tan caqli xumida dumar
Baa ceynkan ii gashay
Waa anigan caraabee
Illaah caadil ah baa jira

Waxaa wiigan Aroos u diyaar garoobaya Aadan iyo Muxiba, ubixii ay beorteena miriiiisa guran rabey, waxaa isugu duceeyay labadoodii waalid, qof walibana diyaar garoow buu samaynayay, anigana intaa waxaa dhex maquurayay badweyn murugo ah, waxaana ku calaalayay

Dhuuntayoo dhalihoolay
Dhibaatana igu badatay
Dhimashadana waa gar
Dhalaana waa dadkiisa
Dhalashana waa maalin

Adduunyo tolloow, xagoon ka tagaa? ma iilkaan u carbabaa? Aamina ma illoobi sidee wax iraa? waraar adduunyadii oo dhan ayaaigu soo kooban tay, ilaa hadana wax sameeyo garanmaayo.

Mararka qaarkood waxaan iskula hadlaa oo aan is weydiiyaa, "Waa maxay Adduunyo." waxaana helay jawaab ah in adduunku uu yahay dhoolo tus iyo Intixan lugu kala ogaanayo dadka ku guud nool

Maalinimadii waxaa ay qado Aroos ah jirtay Aqalka Sa xiibkey Aadan yaro, sidaana aan iiga sii fogeyn, waxaan qadadii ku kulan dad badan mudana aanu is moogeyn, aniga hadal iyo sheeko toona madooneyn, oo waa ay i dhibayeen.

Muxuu calaf kala kaxeeyay laba is rabta isku keenay laba kala didsan, waayuhu dhibadanaa.

waxaa la gaaray maqribkii, waxaana soo qalabqaatay Qof kastoo ku casuunaa u soo diyaar garoobay Xaflada Aadna iyo Muxoba oo lagu qabanayay Hoteel Taleex, kana mida Hoteelada dalkeena ugu caansan.

Qof walbaa oo hareeraha Hoteelka marayay wuxuu is weydiinayay Qofka halkan ku guursanaya Caawa, gees walba oo Hoteelka kamid ahna waxaa xiraa nalal kala jaad-jaad ah, dhinacayada Hoteelkana waxaa ku talaalaa dhir kala nooc nooc ah, korna u qaadeysay Bilicda Hoteelka.

Hoteelka waxaa habeenka diyaar ku ahaa Kooxda Iftiin oo ku caan baxday ka dhawaajinta Miyuusiga, fanaantiinta dalkeena kuwa loogu jecel yahay ayaa iyagana ka soo qeybgalay Xaflada, waxaana kamid ahaa C/llaahi Sulfa.

Waxay martidu ku soo qulqusho ayaa goor ay gooraysadii sheegeysay sidoodii fiidnimo ayey jawi heer sare ah ku bilaabatay Ciyaartii.

Heeso iyo Miyuusik laga daba dhacay ayey ku luuqeeyeen Fanaaniinta, waxaanse anigu jecleystay hees qaali ah oo uu ku luu qeeynayay C/llaahi Sulfa. dadbadana isku maqal ka ahayn. heestaa oo ay mirahooda kamid ahaayeen

Allahayoow nafdaacad ah



Codsi martidii ka yimid awgii ayaa mar labaad martidii loogu celiyay.

Si fudud baan u soo dhax jibaaxay martidii faraha badneyd, waxaana soo abaaray dhankii hobolka anigoo u sida hadiyad, dhankeyga bidix baa waxaa iiga soo muuqday muuqaal aad u bilicsan, waayadana darteed u murugeysnaa, waa Aamino.

Marka ugu horeysa waxaan rumeysan waayay warbixinadii ay ii soo tabinayeen indhaheyga, indhihii baan mir miray, misne u dhaqaaqay dhankii hobolka, hadiyadiina u geeyay, markii aan soo laabtay muuqaalkii aan markii hore arkay meel ku abaran istaagay, waxay noqotay inantii aamina.

Howshii baan wadi waayay dhulka iyo cirka baa halmar ila gariiray, xafladii ayaan dibada uga soo baxay, waxaan saaxiibadey u dhameeyay shekadi arinta i heysatana waan u sheegay,

Xafladii baan ku soo laabanay iyadoo ey gab
gabo ku dhowdahay, labadeenii waji baa si waca
isugu dhacay, ma indho isjacal baa is eegi
kara, waxay dib u milicsatay jacaylkii ba;naa
iyo axdigii ay horay uga baxday, waxaana u
tiriyay gabaygan

kolkii aan ka kabsaday rafaadkii
uuna ku faafay jirkeygii xubin kasta
ee aan la qabsaday dabeecadaadii
ee aan ku waraabinayay sidi ubaxii
ee aad dhax jiiftay wadnahayga
midig iyo bidix, sow ilama aadan imaan
arin aan fileyn.

Aamino oo si aad ah uga xun kala fogaan
shaha ku soo kordhay iyo balantii iyo
axdigii ay ku beeneysay fu;aad baa iyana
fadhigii ka sara joogsatay iyadoo si aad ah
u ilmeyneysa, kuna tiri ereyadan



Gacaliye wanaagi ma goyn,
sidaadaan war waraa,
qol qoladana ka qeyliyaa
talo waalidna waa muhiim
sidaad ogtahay
maankeyga ma aanan gelin
nin kalaad la dakeyn
maan xumo aabahay baa i qasbay
gacaliye xarigii waalid baa jaray
ee maxaan kuu sameeyaa .

intii uu hadalkeeda afka ka dhamaan baa
fu;aad saabiidkii istaagay kuna wada
samir siiyay.

waa xaal aduun xumaan lagama waayo
aadanahaba qaarbaa ilaahii sameystay diida
mid kale sameysta, ha wal walin naftaada
dhaawac baad tahay waxba ha is hiifin
duqii dhalay haduu mid kale siiyay adne
ilaah baa kuu maqan,adne tii laguu qoray
seegi meysid, ee iska ilow jacaylka amino

Fu;aad heesihii iyo muusigii dabacsanaa wuu ka dhago la;aa, sahro ayaa ka codsatay iney isaga baxaan xaflada amin o, weyse iska dhago tirtay.

Fu;aad habeenkaa habeen uga xun horay uma soo marin noloshiisa, wajigiisana waa laga aqrisan karay dhibaatada heysata; wuxuuna kula hadlay aamina ereyadan tiiraan yada leh

waxaa nala daba dhigay geeri
ma harayo ruuxii liitana
indhaweyd waxaan kaaga digayay
ineysan hawada ku leexsan
ama aadan ku darsoomin
axdi been la yaasha
inan yahay waxaad noqotay inaad
ruux kuu dhibaateysan aad cidleyso.

fu;aad asxaabtiisa ayaa kula talisay in uu iska iloobo jacaylkii aamina



Fu'aad wuxuu ku soo gunaanaday hadalkiisii Gabaygan, wuxuuna kaga digayay saaxiibadiis inuu jacaylku. yahay mid lakala gato oo lacag salka ay u heyso, wuxuuna ku billaabay:

Qalinkii jacaylka khadda wey ka maratoo
waxba qorikari maayo .
Qiima malaha caashaqu qeys iyo dabadeed
Lacag baa qaseysa
Qof waloo qawaaf ah ha ka quursto Jaashaga
hana quud-darreysan
Ha u qushuucin weligaa
Qalbigaaga adkee ku qiyaas inuu yahay
Qarmuun iyo Qaraar nafta aan qancinem
ha yeeshee qiil baa jira
Qidcaddan qofmaa qoray ?
Qaabkeeda yaa rogay ?
Ku qamaamay qaayihiisa ? Qofnimadana raaciyay?
Maxaan kugu ciyaasnaa qadarintaadu yaa Tima ?
Qofnimadaadu meeday
Qarannada maxay kuu qireen
Qiyaamaha se qani maa jira aad u qaansheegan
doonto ?

Intaa ka dib xafladdii waa ay dhammaatay, Aaminana waxay ka soo baxday iyadoo murugsan, Fu'aad feker ayaa waaga ugu beryay.

Muddo ka dib markuu Aadan aroosaka ka soo baxay ayuu maalin qado u sameeyay asxaabtiisa, qadadaa maalintaa waxaa ka soo qeybgalay :-
Fu'ad, C/saaq, Ubax, iyo Fartuun.
Qadadii heer sare ayay ku dhacday ka dibna sheeko ayay ku fogaadeen, Fu'aad hadallada waa ay dhibayeen qobkiisa ayuun baa fadhiyay meesha miyirkiisa waxa uu jiray Aamina, goor ay qorraxdu sii liicaysay ayay Muxubo u diyaarisay qolka fadhiga. Casariye, wax la sheekeystaba halkii bey casariyadii ku qabowday, Aadan Yare oo saaxiibkii labaad dhaa ayaa ku yiri sow kaama yaraan jacaylkii Aamina?.

Saaxiib jacaylku maaha mid sahal ku baaba'a, welina waxaa ii muuqda jacaylkii inaga dhexeeyay aniga iyo Aamina oo dhalanteedka ku dhamaaday, Cabdirisaaq ayaa isagana kula taliyay kuna yiri Fu'aadoow maad iska illowdid

Kol haddey aqoontaadii
uub dheer ka tuurtay
iyadaa inkaartiyo eedaadku
raaciye
ka adkoow naftaada.



Intii la wada doodayay ayay saacadba saacad gudubtay, Aadan yare ayaa ugu dambeyntii ku yiri saaxiib iska illow beynu ku leenahay jacaylkii Aamina, illeyn waxay dhaawacday Kalgacalkii idiin dhexeeyay.

Fu'aad muddo ka dib wuxuu aday waddan ka mid ah waddamada Khaliijka, wuxuuna la qabsan waayay cilimadii aad iyo aad ayuu ugu xanuunsaday uguna dhibaatooday, muddo laba bil-ood ah ka dib ayuu xanuunkii ka boskooday, waxayna warqad uga timid Muqdisho, warqaddaa kama socon Waalidkii ee waxay ka socotay saaxiibkii Aadan Yare, warqaddaa waxaa ku qornaa waxyaabo dhowr ah, Fu'aadse filanwaa ayay ku noqotay, warqaddii buu akhriyay dhowr iyo Toban jeer maxaa mood-eyn inuu akhriyay mar qudha, warqadda erayada ku qornaa inta badan fakad bey ku abuureen, Fu'aad waxaa u beryay waa cusub waxaana u shidmay nalal ka densanaa, waxaana u soo noolaatay fursad goor hore ka dhuntay,

ma garanayo markii iigu horreysay ee aan maqlo erayga jacayl, waxaanse si fiican u xasuustay jaraanteydii marka la i su'aalo yaad ifka ugu jeceshahay waxaan si feker iyo feker la'aan ula soo boodi jiray Hooyo iyo Aabbe sidey carruurta oo dhan tiraahdo. Marba marka dambeysa oo aan soo hanaqaado erayga macnahaan u heystay wuu isbeddelayay, waxaa si darandoorri ah ug u soo dhacayay maankiisa jacaylkii ugu horreeyay ee uu abuuray dhalanteedkana ku dhammaaday, sow ma ahanafjo ge maqan, naf xusuus badan neecaaw maqnaasho garaaceyso, naf ifkeedii liif dda u gabatay, naf waxay jamato tebeysa iyo naf u qalbi dheer tii xiisaha u gabtay balse samir aan xiriir lahayn, ma xusuusan tahay Aaminadii darteed marada u xoortay halkeed ku og tahay.

Muddo ka dib waxaa ku soo dhacay bixitaan, tolow haddii aan Muqdisho tago xaggeen talo kaga hagaagaa maya;; Maya anigaa garanaya intuu iskula hadlay uu misna is yiri,



"Aaminadii fiicneyd nafta tii u rooneyd waayuhu nakala raray dhankee baan u raacaa, dhankee baan u raadshaa.

Bixitaankiisa wuxuu la socdsiiyay saaxiibkii Aadan yare, Aamina waxay dhawr jeer ka wareysatay halka uu Fu'aad ku dambeeyo,

Waxaa maamil maalmaha ka mid ah qado ka dib Aadan oo ku jira qolka fadhiga ugu soo gashay Aamina isagoo akhrinaya waraaq ka timid saaxiibkii Fu'aad, Aamina iyo Aadan salaan ka dib waxay isugu dhaqaaqeen sheeko, una badneyd is xusuusin waayo-waayo wuxuuna sheekadii ugu billaabay sidatan: "Aaminaay Fu'aad wuxuu aaday waddamada khaliijka wuxuuna imaanayaa goor dhow ee Aaminaay waxaad iiga warrantaa noloshaada gaarka, xaafadda waxaan ka maqlayayay ee wax ma ka jiraan, haddey wax ka jiraan bal ii sheeg.

Aadanoow hadalkaa waa run inaan kala tagnay aniga iyo musdhaf, awalna aniga aanan dooneyn, jacayl iyo dookhna midna neysku kaayokeenin ee waalid na khasbay,

ismana oran weligeey inta uu Fu'aad nool yahay marwo kale ayaad noqon ee waxaad iigaga warrantaa inuu caafimaad qabo, caafimaadkiisa aad buu u heer sarreey a dhowrjeer ayuu i kaa weydiyay Aamino iyo halka ay ku sugan tahay wax ubad ah ma dhashay, haddey wiil dhasho ha igu samiso kolley dunida isku weynaye.

Hadda hadal iyo dhammaantii waxaan soo dhoweynayaa habeen dambe ee ma igala qeybgeleysaa.

Haa... Haa....diyaar baan ahay, iyagoo sheeko wadaagaya ayaa Muxubo soo gashay kuna tidhi naa Fu'aad sidaan ku yeeli hadduu salaan kaa qaado nasiib baad leedahay ee iska aamus. erayadaasi dhimbil dab dusha kaga dhacay wuu kala kululaa Aamina, waxayna nafta ku qancisay habeenkii ugu dambeysay iyo hadalkii uu ku yiri " Hadduu kala fogaansho dhacay kala dhimasho yay imaan. niyaddaa u dhisantay, Fu'aad isagaba wuxuu ogsoon yahay inaan raaliyo ahaa ee xariggii walid jaray.



Tolow hadduu Muqdisho yimaado maxaan kula hadlaa, anigaa ka gardarnaa nab-sigana galaye, weydiimooyinkaa fareha badan oo kala noocnoocan ah ayaa mas-kaxdeyda ugu soo qulqulayay si talan-taali ah, nafsaddeyda baa dhowr jeer la talisay naa hooy maad joogtid talad an la ruugin waa lagu rafaadaaye, maad ka joogtid jacaylka iyo jiritaankiisa goor been ma sheegtaadu ku beegneyd Afartii galabnimo ayay saariirta soo kortay si ay u gama'do. Masweeliyaha oon sidaa uga sii fogeyn ayay shidatay, waxaana durbadiiba ka soo booday cod debacsan iyo miro macaan, heestaa dhegeysigeeda Aamina aad bey u xiiseyn jirtay waxaana mireheeda ka mid ahaa:

Markii aan ku caashaqay talo igu cuslaatoo
igu caynwareegtay
Ceeb ma laha jacayl waa dawlad calan lahoo
cidi laman hadleysee cillad eebbe keenay
dadka igu canaantoo, cudurdaar u yeela
ceeynkii carraweeliyo cadaw hay noqonine
( Axmed Cali Cigaal ),

markii ay dhowr jeer dhegeysatay
wax hurdo ahna iska weysay ayay
aqalka ugu timid Muxubo, waxayna
ku tidhi : naa maad is diyaarisid
Aadan wuu soo dhow yahay xilligaan
sariirta ayay ka soo booday waxayna
billaawday is diyaarin, mirayadda
ayay ku soo dul istaagtay si ay uga
shaqeyso timaheeda haldhaaga ahaa
rabigeedna ugu deeqay,
Dhowr lebis bey isku bedeshay mid
walibana la xumaanayay, waxayse
markii dambe xiratay dharagaaban
dhallintuna xiiseynayeen, dhowr
qofood baa Aamina weydiisay halkaay
caawa ku casuuman tahay iyo halka
socodkeedu yahay.

Aqalka ayay ka soo baxday si ay
u gaarto xaafadda Muxubo oon sidaas
uga sii fogeyn, dhowr gabdhood ooy
xaafadda isla deggan ayeen ayaa iyagana
weydiiyay caawa halka socodkeedu yahay
Aamina, ruuxii arkaa Aamina aqoonna
u lahayn niyadda ayuu iska ordnayay
alla ku wanaagsan a lebiskaa.



Dhowr tallaabo ka dib waxay soo gaartay
aqalka Muxubo oon sidaa u sii fogeyn,
qolka fadhiga ayay soo gashay sheeko
ayaa isugu baxday labadooda, daqiiqado
ka dibna waxaa yimid Aadan oo watata
gaarigiisa, jawiga habeenkaa wuxuu
ahaa mid deggan, nasiibkuna waa mid
iska furan, waxaa habeenkaa magaalada
iyo hareeraheeda ku da'aysay roob-kha-
fiif ah, dadkuna magaalada teel-teel
buu ku ahaa, dhan walba magaalada
waxaa u muraysay neecaw qaboow,
gaarigii ayay soo wada koreen, wuxuuna
ku soo tallaabsaday waddada Dabka,
waxay shiteen cajal muusik ah iyagoo
sheeko wadaagay, wakhti yar ka dib
gaarigii wuxuu soo gaaray garoonka
diyaaradaha, gaarigii ayay ka soo
wada degteen waxayna soo galeen baar
meesha ku yiillay, intii ay sharaabka
afka kula jireen bey soo degatay
diyaaraddii, waxayna soo istaageen
meeshii loogu talo galay soo dhoweeye-
yaasha, waxaa diyaaraddii ka soo bill-
owday, dhoowr qofood ka dib waxaa u soo
muuqday Fu'aad, gacan haadis bey bilaabeen
waxaase meeshii ku sugi waayay Aamina

meel dhexena kaga hortagtay wey isku
soo boodeen dhowr daqiiqi bey isku
dhegan ayeen dadkii oo dhan baa la
yaabay waxaan meeshaada ugu tegay
Aadan iyo Muxubo soona wada kexeeyay
qarigii ayay soo qaateen iyagoo ay
farxadi ka muuqato, fursad ay sugayeen
waqti badan baa soo maray, Aamina ayaa
ugu horreyntii kula hadashay Fu'aad
kuna tiri:
Fu'aadoow marka hore iga hanti salaan
sidii loo habeeyay, sambabadaagtoodiyo
laga siibay xididdad, marka xiga
ina adeer adduunyada sideedaba saacad
baa la uumay, sidaan kuu illoowo mana
suuroobi meyso, inkastoo nala kala
kexeeyay, saantii aan qaado suuraddaadag
ii sawirane,
Fu'aadoow kulli wixii tegay ka soo
laabo, kalgacal gaboobay nafteyda
ku maray kali baan ku noolahay,
Fu'aad oo isagana la wareegaya
hadalkii ayaa Aamina ku yiri: hadalkii
barashada si fudud lagu kala ceshan
lahaa Aaminooy waan kaa ceshan lahaa
waayo anoo dumaroo dhan ka doortay
ayaad cidlo iigaga dhaqaaqday, haddo
miyaad i tiri igu laabo, durdurkii
markii guray, taqsiintii la sahansaday,
dabeylahu ku qaadeen igu noqo miyaad i
tidhi.



Aaminooy ilko iyo Runba waa la cadeeyaa
soomaali ayaa ku maahmaahda, ee ma og-
soon tahay inaad nabsi iga gashay.

Fu'aadoow taa hortaan kuugu sheegay
inuu waalid i qasbay xarigiina jaray
ee hana kala raebin, hana kala rarin,
hana raad goynin aan reys degnee.

Kalgacalkii uu u qabay ayaa ka
tan badiyay murugana ku yiri: "Mabadii
caashaq wadarga haddey wada daalaaan
marna leysma diidee ee haddaan wada
dalno wixii naga tegay ka soo laabo.

Intii ay isxusuusita ku jireen
ayuu gaarigii soo gaaray xaafaddii
Fu'aad, Fu'aad ayaa asxaabtiisii ka
codsadeen inuu xaafadda la gaaro,
Fu'aad waa uu aqbalay codsigaasi
waxayna wada yimaadeen xaafaddii Aadan,
waxay soo fariisteen qolka fadhiga,
Aamina iyo Fu'aad sheekadii bey halkii
ka ambaqaadeen, Fu'aad ayaa ka wareystay
sidii ay ku kala tageen Mustaf.
Fu'aadoow waad ogsoon tahay labadii aan
jacayl isu keenin ee waalid isu keenay
inaysan isku raagin ee adiga cadaashaay
jacayl ma beertay. ?
Aaminaay maxaan caashaq beeraa weli
waxaabo ii muuqdee kalgacalkii aan kuu
qabaye

Jacayl dambana inaan beero waan ka dhaartay, illeyn waxaan aaminsanahay jacaylkaan aburraba inuu ku dhamaanayo dhalanteed.

Fu'aadoow maxaad u habaareysaa nasiibkaaga waa uu kuu oggolaan karaa inaan guur xalaal ah iskula dakeyno, jacayl dhab ah iskula dhaqaalahaan, inta ka dib iyadoo sheeko lagu sii fogeeday ayuu Fu'aad soo jeediyay in uu xaafadda gaaro, waxayna dhigteen ballan in ay habeen dambe xaafadda ka soo raadiyaan, Fu'aad waxaa la keenay aqalka waxayna is qaabileen Walidkii iyo asxaab kale, dhowr daqiiqado ah ayay is wareysanayeen, inta ka hurdo ayuu isu diyaariyay.

Markuu u waagii beryay ayuu isdiyaarin billaabay si uu u oofiyo ballanta saaxiibkii Aadan, aqalka ayuu ugu yimid isaga oo wata gaarigiisii, in yar ka dib gaarigii ayay soo qaateen, markii uu si toos ah qabsaday wadadda ayay billaabeen Sheeko iyagoon sahnad ku dhowaad sheekeysan.



Fu'aad iyo Aadan waxay ahaayeen Laba saaxiib oo aad isugu dheer, aanna kala carsan hadalladа, Aadan wuxuu saaxiibkii la socodsiiyay marxaladdii uu la kulmay intii uu dibadda jiray, saaxiib maalin anigoo jooga aqalkeyga ayay Aamina iigu timid, anigoo akhrinaya dhambaalkii aad ii soo dirtay, salaan ka dib waxaaii billowday sheekooyin, anigoo hadda ka hor maqlay Aamina iyo Mustaf wey kala tageen, waxayna ii sheegtay in hadalkaa wax ka jiro, anigunа waxaan la socodsiiyay Fu'aad inuu jiro waddamada Khaliijka goor dhowna iman doono Dalka, waxayna dhowr jeer igu tiri wiilkaa aad baan u jeclahay weji aan kala hortagana ma heysto, illeyn ana a godob ka galay, waxaanse laabta ugu qaboojiyay isaguba waa uu ogsoon yahay in xariggii walid uu jaray ee Aamina wax eed ah aysan lahayn.

Gaarigii intii uu dhex mushaaxayay magaalada ayay sheeko isugu baxday, Fu'aad ayaa isagana saaxii kii la socodsiiyay inuu ruuxaan weli jeceylkeeda igu dhammaan, khaliijkana aan ka joogi waayay ee saaxiiboow ila tali sidee baan yeelaa.

Saaxiib aniga ahaan waxaan kugula tali-
nayaa in aad halkiinna ka sii wadataan
jacaylkiinna kol haddaad is hesheeen,
Fu'aad waxaa niyadda u sii dhisay hada-
lladii saaxiibkii, waxayna subaxaa soo
mareen dhowr meelood, waxay ka soo
rawaxeen magaalada, waxayna dhigteen
ballan caawa inay u casuuman yahay
isaga iyo Muxubo iyo Aamino, xilligana
ballantuna waa (7:00) Toddobada fiidnimo,
Fu'aad qado ka dib sariirta ayuu isku
tuuray si uu u gam'o,

Goor casar gaab ah ayaa Aamina
ugu soo gashay aqalka isagoo jiifa
wey soo dul istaagtay, Fu'aad wuu soo
toosay wuxuuna la yaabay ruuxa dumar
ee dul taagay, Cadar iyo udgoon,
carfoon baa soo galay mise waa Aamina
waa tii naftiisa la saaxiibtay, fadhiga
ayay soo wada fariisteen, Fu'aad wuxuu
billaabay sheeko dadihis iyo inuu ugu
luqeeyo erayo macaan adna ay uga heleysay
Aamina waxay soo qaadatay ( Album ) ay
sawirro ka buuxeen, waxayna Aamina
jecleysatay dhowr sawir oo Fu'aad
leeyahay, weyna ka codsatay, Fu'aadna
waa uu ka aqbalay.



wuxuu u soo bixiyay haddiyooyin uu ugu
soo talo galay, run ahaantiina farxad
ku abuurtay,

Qorraxdii galbeed baa dhacday,
Fu'aad wuxuu Aamina la sicodsiiyay
inay caawa u casuuman tahay isaga,
lebis iyo is diyaarin buu billaabay
isagoo is diyaarintii u jira ayay
yimaadeen Aadan iyo Muxubbo watana
gaarigoodii, dhowr daqiiqo ka dib
aqalka ayay ka soo wada bexeen iyaga
oo soo wada fuulay gaariga,

Intii uu gaarigu dhex mushaaxayay
ayaa leysku soo qaaday waa halkee caawa
casuumaadda, Ma Jubbaa, Mise Guuleed,
intuba maaha ee Waa Hotel Towfiiq,
gaarigii ayaa loo soo duway dhankii
Hotel Towfiiq, waddada 30'ka ayay la
soo leexdeen, gaarigii ayay dhigteen
Hoteelka hortiisa, Hoteelka waxaa ku
xirnaa nalal kala jaad-jaad ah, fadhiga
ayay fadhiisteen, waxaana markiibaa
yimid shaqaalihii loo carbiyay cunno
qaadidda wax dalab ama anigaa dalbaya
ayaa dhowr seken lagu doodayay, waxaase
habeenkaa cashadii dalbay Aamina.

oo habeenkaa farxadi ka muuqatay, cashadii markii laga soo baxay ayaa la soo maray meelo badan xusidna ku mudnaa, intii ay dhexmarayeen magaalada bey saacadba saacad u dhiibtay, Aamina ayaa soo jeedisay in la fasaxo waqtiga oo ciriiri ku ahaa dartii, ballan bey xirteen Fu'aad iyo Aamino, rugta ballantuna waxay ahayd aqalka Fu'aad, waxayna isku raaceen inay galaan Tiyaatarka oo ay ka socotay Riwaayad Banaadiri ah, aadna loo xiiseyn jiray waqtigaa Riwaayaddaa oo magaceedu ahaa: Maxaa Keenay Naseyrka, habeen wanaagsan baa hadal isugu dambeysay.

Markii la gaaray galabnimadii Arbacada habeennimadeeduna ballansan ayeen Fu'aad iyo Aamino, ayuu Fu'aad u diyaargaroobay ballanta, in yar ka dib Aamino aqalka ayay ugu timid, iyadoo xiran lebis aad u heer sareeya, una socota socodkii iyo xarragadii lagu yiqiin, marag ma doontaduna waxay ku beegneyd Todobadii fiidnimo, waxay soo raaceen Basaska magaalada ka shaqeeya, waxayna gaarigii kaga degeen Zoonaha Tiyaatarka,



Dad fara badan baa hor tubnaa agagaarka Tiyaatarka, iyaga oo doonayay inay galaan Riwaayadda, waxaa habeenkaa agagaarka marayay gawaari fara badan, waxayna soo wada galeen tiyaatarka iyagoo gacmaha is heysta, waxayna fariisteen kuraasta dhexe fadhigooduna caan ku ahaa.

Riwaayaddii baa billaabatay waxaana soo hor marayay inanan yar oo wareejinaya garameello, Fu'aad wuxuu u soo qabtay xeyn garameello isaga oo fursad ugu shubay Aamino, dhowr xabbo ayay is weydaarsadeen, ayagoo afka isku gelinaya sheekana wadaagaya.

Aamina waxay Fu'aad ka codsatay inuu habeen dambe ugu yimaado Aqalka, Fu'aad isma hortaagin, wuxuuna niyadda iska yiri sow ma joogto habartii qeylada badneyd iyo Sahradii uu xiriirkeennii sii xumeeday, micna ma laha buu iskula hadlay, Aamina lafteedu kuguma ballamiseen guri dad badani joogaan.

Ayagoo sheekadii iyo ballamadii u socdaan ayay dhammaatay Riwaayaddii, waxayna ka soo wada bexeen Tiyaatarkii, waxayna soo wada qaateen Taxi, Aamina Xafaddeedu sidaa u sii fogeyn ayuu keenay.

ka dib aqalkiisa ayuu aaday, Fu'aad waxaa maskaxdiisa kala weynaatay Aamina Aqalkooda gal, dhowr gabdhood bey is barteen midna aqalkeeda ma gelin, haddii lagu yiraahdo aqalka maxaa ku soo geshay wax aan ku jawaabo ma haysto, wuxuuse ugu dambeyntii go'aan ku gaaray inuu fuliyo ballanta.

Waxaa subaxnimadii aqalka ugu yimid saaxiibkii Aadan, wuxuuna la socodsiiyay arrimaha ku soo kordhay xalay iyo inay ballansan yihiin Aamina caawa, Aadan yare wuxuu saaxiibkii dhowr mar u soo jeediyay inuu guursado Aamina, Fu'aad wuxuu mar waliba ku oranayay waan ka soo fiirsanayaa iyo erayo kale oo la mid ah.

Fu'aad wuxuu ahaa dadka loogaga dambeeyo erayada kaftanka, saaxiibkii Aadan ayaa ku yiri Caawa markaad aqalka ugu tagto ku soo qaad arrimo Guur, waxay damacsan tahayna bal eeg, saaxiib Aamina guur diyaar bey u tahay ee anigaan diyaargaroobin, Fu'aad saaxiibkiisa koowaad wuxuu ahaa Aadan, talooyin iyo waanooyinka kala qaadan jiray.



dhowr go'aan ayay isla gaareen waxayna ugu dambeyntii ku kala tageen wixii kugu soo kordho ila socodsii.

Markii uu gabalkii dhacay ayuu is diyaarin billaabay, wuxuu habeenkaas lug ku soo maray meelo badan, socodkooduna caan ku ahaa, waxay habeenkaa wada kulmeen Cabdirisaaq oo aysan in muddo ah is arag, waar saaxiiboow halkee baad ku dambeysay, xaafadda in aad ka guurtayna waan maqlaye, sheekadii baa isugu baxday, waxayna fariisteen Baar ku yiil Waddada, Shaah iyo cabitaan kale ayaa loo keenay intii ay isla falanqeyn hadallada dhowr arrimo ayay isku ogaayeen ayay is xasuusiyeen, Fu'aad ayaa C/saaq ku yiri saaxiib ballan noo xir wakhtiga ayaa caawa igu yare, waxaanne leeyahay ballan aan aad u xasuusanayo, xilliga ballanta waxaa ka dhinnaa 15'daqiiqo, subixii iga soo raadi xaafadda ayay ku kala tageen.

Dhowr daqiiqo ka dib waxa uu soo gaaray Xaafaddii Aamina, waxaa habeenkaas la kulmay Fu'aad Aamina oo dibadda ku sugeysay, salaan ka dib aqalka ayay soo wada galeen.

dhowr daqiiqado ahna wada joogeen ayay
u timid Sahra, waxayna si fiican u eegtay
Wiilkan Xaafadda cusub yimid, Salaaan ka
dib wey garatay inuu yahay Fu'aad, oo
beri hore xiriir fiicani ka dhexeeyn jiray
Aamina, Sahra iyo Fu'aad dhowr hadal bey
is weydiiyeen, waxayna si fiican uga
warreysatay habeennadii xaafadda dhowrka
ciyey ee kulu lagula hadlayay iyo xaalkiisa
meesha uu marayo,
Sahra waxay Fu'aad ku tiri weligaa
jacaylka Aamina mid ka horreeyay
ma beertay, haddaad beertayna
dhibaato la mid ah kii Aamina
ma kala kulantay, Fu'aad habeenkaa
wuxuu Sahra kaga sheekeynayay wixii
uu la kulmay waqtigiiyadii horey u
soo maray farxad iyo murugaba,

Sahra iyo Fu'aad iyagoon weligood
saacad qudha wada joogin bey habeenkaa
muddo laba saacadood ah sheeko wadaagayeen,
Aamina ay[illegible] soo qashay, misna
waxaa habeenkaa la yaab ku noqotay,
Sahra iyo Fu'aad oo sheeko isugu bakday
weligoodna daqiiqad qudha wada joogin,
Fu'aad iyo Aamina waxay habeenkaa ku
heshiiyeen inay labada waalid isugu
duceeyaan si wada jir ahna ugu tagaan.





Aamino aahabeed baa hadda ka hor u ballan-
qaadey in uu ku dari doono wiil Allaale
wiilkey koensato.
F'uaadna wuxuu Go'aan ku gaarey in uu mar-
uun guur kula dakeeyo.
Aamino waxay laheyd qurux weyn iyo dabeecad
Rabbi Deeq ugu dhigey, mana xaheyn
gabdhaha dhaqankooda ka taga.
Fu'aad aabihii buu ka codsadey lana socod-
siiyey inuu dhowaan guursan doono gabadhi
Xaajiga, wuxuuna igu yiri aan is aragno
aan is aragno waalidkaa si aan isugu kiin
duceyno.
Goorey casir gaab tahay gabalkiina isu
diyaariyey godkiisii, saan-saan mugdina
soo if baxay bey dhowr odey xaajo ku
falanqeeyeen aqalka Xaaji Farxaan Aamina
aabaheedna ahaa, dhowr mar baa hadal la
isku qabsadey xaajana la falanqeeyey,
ugu dambeyntiina waxaa la go'aamiyey in la
isugu duceeyo wakhtiyada soo socdana la
isu guuriyo.
Aamina waxay horey u dhaawacdey kalgaceyl-
kii ka dhexeeyey Nasiib wanaagse sabraa
sadkii hela

Fu'aad iyo Aamina waxay isla garteen in dhibaatada adduunyada looga gudbi karo dul qaad, Kalsooni iyo niyad bir ah, Fu'aad iyo Aamina waxay noqdeen laba wad aga nolosha adduunyada mid walibana waxa uu la kulmo waxaa uu la socodsiin jiray ka kale.

Noloshoodii intii ku dhinneyd waxay ku dhameysteen Dul qaad Deggan an iyo Jacayl Dhab ah.



Waxaa dhowr maalmood ka dib la diyaariyey Xafladdii aroosku meeshi ay ka dhici laheyd waxaa la siku raacey in lagadhigo xaafadda Reerka Aamino. Habeenkaa wuxuu ahaa habeen farxadeed dadka habeenkaa xafladda ka soo qeybgaleyna aad iyo aad ayay u damaashaadayeen. Jewigu wuxuu ahaa mid iska kulul sababtoo ah waxaa lagu jirey xilli kuleyle ah. Dadkuna aad bey ugu damaashaadayeen Jewiga heerka sare ah.

Fu'aad waxaa indhihiisa soo buuxiyey ilmo fara badan. Dhamaan dadkii aad bey u wada khushuuceen, waxay is weydiiyeen waxa heley Fu'aad. Fu'aad waxaa ku soo maaxdey dhibtii iyo dhaawacyadii ka soo gaarey-kal-gacalkii Aamino iyo nasiib caawa u suura geliyey iney Aamino Marwadiisi noqoto. Fu'aad wuxuu ugu dambeyntii halalkiisi ku soo gabagabeeyey "Calaf waa wax jira cidina kaama celiso caadilkii ku uumaye". Habeenimadii waxaa loo gelbiyey Howygii adduunka eey marwo ka noqon laheyd.

D H A M A A D.

# X U S I D.

Ma hilmaamin Saaxibkey Yuusuf Abikar Cali, qisadanna in la soo bandhi o fikradeeda lahaa, mudarna igula howlahaa soo saarideeda.

Marna abaalkiisa aanan gudi karin.

Yuusuf wuxuu ku dhashey Afgooye Sannadkii 1969-kii

Wuxuuna ku soo barbaarey Magaaladan Muqdisho.

SHeekooyin soo bixi doona :-

| | | |
|---|---|---|
| Iima QALANTID | waxaa Qorey | Max'ed Guuleed |
| Saaxibtey Lillaahiya | " | C/llaahi Cabdi Xusen |
| Farxad iyo Filanwaa | " | Xuseen Sh.Biixi |
| Damac Iyo Darxumo | " | Yuusuf Abiikar Cali |
| Quruxdii luntey | " | Xuseen Iddiris Aadan |
| Hubsiimô La'aan | " | Maxamed Guulaaed aadan |

Saaxiibbo isa sirey iyo Jaceylkii Xamar, waxaa qorey - C/llaahi Cabdi Xuseen (HENERI).

F I L A SH O  W A C A N

HIB

QISO JACAYL

ha dhaawicin kalgacalka

waxaa lagu daabacay xamar iç^^

QORE CABDULAAHI CABDI XUSEEN

IYO

YUUSUF ABBIKAR CALI

HIBEYN

BUUGGAN WAXAAN U HIBEEYAY

AADAN MAXAMAD IBRAAHIN

CABDIRAXMAAN CUMAR IBRAAHIN

# M A H A D - N A Q

Buuggan waxaan uga mahad-naqeynaa intii gacan igu siisey igana gargaartey soo saariddiida .

Haba ugu horreeyee saaxibkey :-

Aadan Maxamed Ibraahim (Geesey)

Cabdi Aadan Iimaan ( aalyan)

Shamso Macallin Cabdullaahi

Xuseen Iddiris Aadan (Iftiin)

Maxamed Cabdi Xuseen (Xaaji)

C/Xmaan Cumar Ibraahim (

C/Risaaq Axmed Faarax (kuus)

Daa'uud Cali Diiriye

Y . C . M. (kaahiye)

Maxamed Guuleed Aadan (Seyga )

Rajis Axmed Maxamed

Maxamed Xasan Dhiblaawe

Xuseen Shiiq Biixi

Waxaa mahad gaar ah mudan in la sheegana mudan Gabadha iisuura gelisay inaan u soo ban-dhigo qisadaan mar labaad daabacaha. Istarliin Cabdulle Yuusuf.

W.Q. C/llaahi Cabdi Xuseen (HENERI).

GACALIYE.

EED MALAHA JACAYLKA, WAXAA SOO ABAABULAY AABAHEENA AADAN, MARKUU EEGAY XAAWO INEY AAYO WACAN TAHAY.

GACALIYE INKASTOO ADDUUNYADAN CALAF JIRO HADDANA YEYNAAN IS MOOGAAN, INKASTOO JACAYL KEENU DHISMAA.

GACALISO.

SUURADAADA SAMAANTEEDA SEEDAHAYGA KU TAALEE KAAMA SEEXDO HAYGA SOCDAALIN? SAFAR DHEERNA HAYGA AADIN, SABO DAAN KU NOOLAHAY SURANKEEDA HA DHAAFIN, DHAX SABEE WELIGAA.

SADRIGA IYO LAABTA SAWAXAN BAA KA BAXAAYA KU SALEYSAN SAMAHAAGA, AAN KU SIFOOBIN XUMAHAAGA.

SI KASTOOY AHAATIYO SAWAN WALBA OO LA JOOGO LA SOCO'WAAN KU SUGAYAA.

Soo Saare

Yuusuf.A.Cali Gacalka